# Dawladda Hoose Ee Hargeisa

## Aggaasimaha Dhulka D/Hoose Hargeisa

Ref/DH/GHDDH/ ___ /2024 Geasol Date: 13 /07/202

Ku: k/Duqa Caasimada Jsl =Hargeys
Og: Duqa Caasimada Jsl =Hargeys
Og: xoghayaha Fulinta Dhh =Hargeys

Ha looga dulgaado Maps/Area Ref coverlky 02-11-2024

**Ujeedo: jawaab celin**

Tixraaca waraaqda ku suntan DHH/D/AMH/476/2024 ee ku taariikhaysan 22/June/2024 taas oo ka soo baxday labada xafiise ee kala ah xafiiska gudoomiyaha dagmada AMH iyo xafiiska agg dhulka, ujeedaduna ay ahayd warbixin faylal.

Tixraaca qoraalka mayor-ka ee ku dulqoran waraaqda tixraaceedu yahay DHH/D/AMH/476/2024 kuna taariikhaysan 29/.06/2024, qoraalkaas oo nuxurkiisu ahaa in yeedhmo loo sameeyo sharcigoodana la eego ama maxkamada loodiro.

Hadaba mayor waxa aan iskugu yeedhay labadii dhinac ee cabashadu ka dhaxayso tariikhdu marka ay ahayd 04/07/2024 sirkan oo ka dhacay hoolka shirka ee dhh, balse waxaa noo suurto gali wayday in dhinaca 35 ninkii wakaalada sitay in uu iman waayay maadaama oo ninka la idhaah 35 uu xidhan yahay,sidaa daraadeed shirkaasi uu baaqday.

Taariikhdu marka ay ahad 11/07/2024 waxaa inoo qabsoomay shir balaadhan oo ay ka soo qayb galeen agg dhulka iyo xildhibaano golaha deegaanka hargaysa ah dhinaca kalana waxaa fadiyay ninkii wakaalada ka haystay (35) iyo odayaashoodii.

Hadal,falan-qayn iyo dood dheer kadib ninka la idhaah ina af jawan leh waxaa uu natusay shan map oo uu dhulka ku sheeganayo shantaa map-na mid walba waxaa uu noo sheegay afarta jiho cida ijaarada ay ku wadaagaan ama ka xigta waama u yeedhna midwalbana waanu dhaarinay waxa la waayay hal qof oo u markhaati fura, qof waloo aanu waydiinaa waxa uu lahaa dhulkan malaha 35.

Filro gaar ah dadkan aamu markhaatiga waydiinay waa dadkii ay 35 dhinocoodu noo sheegeen in ay ijaaro leeyihiin.

| no | Magaca | Qolads | Markhaatiga |
|---|---|---|---|
| 1 | Reer faarax | Ciise muuse | 35 umuu markhati furin |
| 2 | Ilma cabdi muxumed | arab | 35 umuu markhati furin |
| 3 | jimcaale | Sacad muuse | 35 umuu markhati furin |
| 4 | Ilma marya case | Ciise muuse | 35 umuu markhati furin |
| 5 | Ilma gaambiye | Ciise muuse | 35 umuu markhati furin |
| 6 | Iima cabdi bidaar | samaroon | 35 umuu markhati furin |
| 7 | geedi | arab | 35 umuu markhati furin |
| 8 | Khayre beegsi | Ciise muuse | 35 umuu markhati furin |
| 9 | Ilma aw raali | isaxaaq | 35 umuu markhati furin |
| 10 | Ilma cali dayr | isaxaaq | 35 umuu markhati furin |
| 11 | Jamaal macalin | Ciise muuse | Telephone ka igamuu qaban |

Sidaasi darteed gudoomiye dhamaan dadkaa markhaatiyada ah waa dadkii uu liyeedhiyay ina af jawan leh ee uu idhay waa dadka aan iyaarada lahayn hal qof oo u markhaati furayna ma jiro, waxaan ku talinayaa in dadka iyo umadaba laga qabto ina afjawaanle.

05-11-24

Eng ahamed'abdi omer (eng ahmed sabca)
Kusimaha aggasimaha dhulka

Ag. Dhulka DHH
adiga oo ku dumaya warbixinta farsamo-yaqaanka lo dunay soo daaya filaha kan system ku hakisanaa
02-10-2024

N: Samira
adoo raacaya amarada fulinta sidaa ugaga dulgaad
15-06-2025

# AL-BARAKA PUBLIC NOTARY

## ..TAYADA SHARCIGA AH EE HARG- EE (AL-Barako)

..7231-4452525 -4428843-4049494 - Email: ...@hotmail.com-notaayoharqeysa@gmail.com

..EF: XNH/AL/---378---------/2024. Taariikh -30/07/2024

**KU-DUQA CAASIMADA HARGESA**

**OG:TALIYAHA QAYBTA BARIGA HARG-**

## UJEEDO:CADEYN

Anaga oo ah Odayaasha iyo Ehelada u Dhawo **MAXAMUUD CABDILAAHI DIIRIYE(35)** Magacyadoodu Hoos Ku Qoran Tahay Waxaanu Xafiiska Nootayadda Sharciga Ah Ee Harg. Al-Barako Horteeda Ka Cadeynaynaa anaga oo miyir qabna caadi ah cidina aaney nagu khasbin in **MAXAMUUD CABDILAAHI DIIRIYE(35)** Laga Been Sheegey Qoraal Wakaaladeed oo uu Siiyey **MAXAMED JAAMAC XASAN (Ina Af Jawaan)** Kaas oo Ay Sheegeen isaga iyo Koox uu La Socdaaba In Isaga oo Nool Ay Sheegeen in uu Wakaalad u Siiyey Dhulkiisa Kaas oo. Dhulka Ay la Leeyihiin Walaaladii oo ay Dhaxal Tahay Wax Gaar Ahna Aanu Laheyn Balse uu Sharciga ku Qoran Yahay Maxamuud Cabdilaahi Diiriye, Anaga oo ah dadkii uu Dhaley iyo Eheladiisa oo Loo baahnaa in aanu Wakaalada Kula Qoranaano oo Aanu Markhaati ka Ahaano Taas oo aaney Waxba ka Jirin Warqada Wakaalada ah ee laga Been Abuurey, Anaguna aanana Dadka beeraha nala Jaarka ah ee dhinacyada naga xiga aanaan is Haysan Madahayguna ay caadi yihiin Wixii Dan guud Ahna ay Dawladu Hoose ee Hargeysi naga Qaadey lana Dajiyey Barakaca Magaalo Barwaaqo, Waxa Kale oo Jirta In Ay Leeyihiin Wakaaladan Waxa Ku Qoran Dhul Kale oo uu leeyahay Maxamuud Cabdilaahi Diiriye (35) Ayaa Leh oo Dad Kale Lagu Haysto balse Aaney Jirin Wax Kale oo uu leeyahay iyo Beer u Dhow Wadada Labada Boqol, Wixii uu leeyahay Waa uu ka madax Banaan Yahay Dhulkaas Dadka Lagu haysto, Sidaasi Ayaanu Cadeyneynaa Hadaanu Nahay Ehelada Ugu Dhow Maxamuud Cabdilaahi Diiriye

Sidaas Darteed Waxaan U Sheegeynaa Cid Kasta Oo Dananeysa Cadeyntan Waa Inay Sidaas Ula Socoto Kuna Dhaqanto.

ALAA MAHAD LEH.

| Magaca Cadeynta Bixiyeyaasha | | Saxeex |
|---|---|---|
| |  1-XARHR MAXAMUUD CABDILAAHI DIIRIYE TELL:063-4237499 | |
| |  2-CUMAR MAXAMUUD JAAMAC WACEYS TELL:063-4081213 | Saxeex |
| |  3-CABDI XUSEEN AADAN TELL:063-4418197 | Saxeex |

**Ul-Caddayn Notaayo:** Xafiiska Notaaydda Sharciga Ah Ee Hargeysa *Al-Baraka* Horteeda Ayaa Lagu Hor Saxeexay Cadeyntan Waana Mid Sharci ah oo lagu dhaqmi karo, Lehna Xoog Fulineed.

**MADAXA XAFIISKA- AXMED CABDI SICID**

XAFIISKA NOTAAYADA HARGEISA AL BARAKA PUBLIC NOTARY AXMED ABDI SAID

JAMHUURIYADA SOMALILAND
REPUBLIC OF SOMALILAND
Xafiiska Gudoomiyaha Degmada

DAWLADA HOOSE HARGEYSA
HARGEISA MUNICIPATIY
District Commissioner Office

DHH/D/AMH/ 476 /2024.
DATE :22th June 2024.

KU :Duqa Caasimadda Jsl
OG:Xoghayaha Fulinta D/hoose
OG:Duqa Caasimadda Jsl
=Hrg=

UJ :**Warbixin Faylal.**

Tix raac qoraalka daraafka ee ku taariikhaysan 10th June 2024, ujeeddadiisuna ahayd ka soo warbixin faylal sharci oo dhamaaday iyo kuwo hakisan.

Haddaba, mudane mayar markii aanu eegnay fayisha documents ahaan iyo dhul ahaan waxa noo soo baxay :-

1. Faylasha Tr-9315,9309,16895,16983,16890,9313,9305,16885,7597,4774,16881,11253 iyo Fayl No.68026, waa faylal processkii sharci maray oo ku dhamaaday si sax ah, cashuuraha sanadkana bixiya.
2. Faylash Tr.37935,37938,37609,34642,37639,30635,25636 waa faylal qaar cashuurmeen balse xafiiska mapka dhaafin, qaarna waa kuwo degmada ku hakisan sabab mapka beerta oo hakisan.
3. Dhamaan dhulkaas waa dhul seesan, kaabadaysan, melena ay deyran yihiin.
4. Dhamaan faylaashi waa beerta Maxamed C/laahi Raage oo mapkeedu hadda hakis ku jiro, balse markii hore ahaa mid faylashu ka baxaan.

Sidaa darteed, faylaashi waa kuwo sharcigii hore ugu dhamaaday iyo kuwo sharcigii ku dhex jira oo hakis ku jira.

Fiiro gaar ah.

Beerta Maxamed C/laahi Raage hakisan waxay u baahan tahay in cida dacwoonaysaa ay dacwad furato, maadama aanay jirin wax dacwad sharci oo ay keeneen, si loo kala baxo.

Shaqo Wacan

Maxamuud Cabdi Xasan
Gudoomiyaha Degmada A/M/Harun

Maxamed Yuusuf Cismaan
Agaasimaha Waaxda Dhulka D/hoose Harg.